



# Edlevo app ogeysiinta maqnaanshaha

Ogeysiinta maqnaanshaha carruurta iyo ardayda waa in la diiwaangeliyaa ka hor inta aysan howl maalmeedku dugsigu bilaaban, waalidku waa in ay ka diiwaangeliyaan adeega appka Edlevo. Waa in aad usoo ogaysiisaa dugsiga xanuunka caruurta si joogta ah maalin walba. Maanta ama barri.

Markuu ardaygu 18 jirsado, waalidku masii ogaysiinayo dugsiga maqnaanshaha ardayga. Ardayda qaan-gaarka ah ee dhigata dugsiga sare iyaga ayaa ka warbixiyaan maqnaanshahooda.

Codsiga ku saabsan fasaxa dugsiga, raac tixraaca [www.kristianstad.se](http://www.kristianstad.se) ee adeegyada elektarooniga ah. Dugsiga Xannaanada iyo hoyga xiliga firaaqada/Fritidshem waxaa laga diiwaan galinayaa jadwalka caruurta iyada oo la adeegsanayo adeega Edlevo app. Isbuuca aad doonayso fasax ku calaamadee fasax isaga dhan, hadii aad doonayso fasax maalmo gaar ah waxa aad ka tagtaa maalinta oo madhan (waqti aan lahayn). Macluumaad intaas dheer waxa aad ka heli kartaa mareegta [www.kristianstad.se/registrerabarnschema](http://www.kristianstad.se/registrerabarnschema)

## Ogaysiinta maqnaanshaha

Gudaha appka Edlevo, waxa aad doorataa maqnaansho kadibna calaamadee ilmaha/carruurta aad ogaysiinayso maqnaanshahooda. Waxa aad dooran kartaa

- Maalinta oo dhan, maanta ama berri.
- Waqti cayiman oo maalinta ka mid ah, adiga oo wargelinaya taariikhda iyo wakhtiga maqnaanshaha.

Haddii ilmahaagu dhigto hoyga xiliga firaaqada/Fritidshem oo maqnaanshaha la soo diiwaangeliyo maalin dhan, maqnaanshahaas waxa uu khusayn doonaa labadaba dugsiga iyo hoyga xiliga firaaqada/Fritidshem. Haddii maqnaanshaha gaar u khuseeyo hoyga xiliga firaaqada/Fritidshem, waa in la doortaa maqnaanshaha ku meel gaadhka ah oo aad geliso wakhtiyada hoyga xiliga firaaqada/Fritidshem.

## Maqnaanshaha la soo wergeliyay

Halkaan waxa aad ka arki kartaa nuuca maqnaanshaha carruurtaada loo diiwaangeliyey. Warbixinta maqnaanshaha maanta ama mustaqbalka, waxa aad awoodi kartaa in aad masaxdo maqnaanshaha la sheegay adiga oo gujinaya badhanka tirtirida.

## Maqnaanshaha la diiwaangeliyay

Halkaan waxaa ka muuqda maqnaanshaha laga diiwaan galiyay caruurta hadii uu yahay maqnaansho ansax ah iyo maqnaanshiyo aan ansax ahayn.

## Fariinta ku socota dugsiga barbaarinta ama hoyga xiliga firaaqada/Fritidshem

Gudaha adeega appka Edlevo, waxaa suurtagal ah in fariin loo diro dugsiga barbaarinta ama hoyga xiliga firaaqada ayada oo la gujinaya calaamadda isugeynta ee ka hoosaysa ciwaanka ee ku qorantahay fariinta macluumaadka/informationsmeddelande calaamad ku samee caruurta ay khusayso. Kadibna gujii badhanka ku yaal geeska midig ee hoose si aad u qorto fariintaada oo aad u dirto. Fariinta waxa ay u muujinaysaa barayaasha joogitaanka guud ee dugsiga barbaarinta ama hoyga xiliga firaaqada/Fritidshem.